



Young Audiences
Arts for Learning
Oregon & SW Washington



Qoysaska Sharafta leh,

Young Audiences waa urur farshaxan oo aan macaash-doon ahayn oo hawshiisu tahay dhiirigalinta da'yarta sidoo kalena fidiya barashadooda farshaxanka. Ilaa 1977, waxaanu caawinay dugsiyada iyo ardayda qaadhaan ururin loogu talagalay barnaamijyada farshaxanka oo leh barnaamijka sanadlaha ah ee jog-a-thon.

Sanadkani barnaamijka Run for the Arts, carruurta gobolka oo dhan ayaa lagu martiqaaday in ay qoob ka ciyaar sameeyaan, ama si gaar ah ugu dhaqaaqaan, qaabka qoob ka ciyaarka dance-a-thon! Way dhaqaaqi doonaan oo is ruxi doonaa si loo ururiyo qaadhaan loogu talagalay waayo-aragnimada farshaxanka ee dugsiyadooda. Waayo-aragnimo xusuus leh sida safarada aqoon kororsiga, iyo barashada gacmaha wax laga qabanayo oo leh qaybo kala duwan, meelaha la degan yahay ee leh farshaxaniistayaal barid oo xirfadeed waxay xoojin doontaa jacaylka ay u qabaan barashada iyo sii xoojinta fahamkooda maadooyinka kala duwan.

Ilmahaagu wuxuu ka qayb qaadan karaa madadaalada inta ugu badan ama ugu yar sida uu rabo! Abaalmarino iyo dhiirigelin ayaa lagu bixiyaa inta hawsha lagu jiro. Waxaan rajeynayaa in aad ku dhiirigalin doonto isaga inuu ku soo biiro, ku madadaaloodo, oo taageero dugsiyiisa!

Fadlan caawi ilmahaaga adigoo:

1. Diiwaangalinta ilmahaaga si uu u qaato deeqaha dhanka internet-ka ee **www.funforthearts.ya-or.org**. Ardaydu waxay ku qaadan karaan deeqaha dhanka internet-ka, deeqaha ka baxsan internet-ka, ku qaadan karaan iyagoo xaadir ah, ay ku keydsan karaan sharraxaadooda lacag ururinta dhanka internet-ka ama dooran karaan inay sameeyaan labadaba.
2. Ka qaadashada deeqaha ee dadka wax damaanad qaaday sida qoyska, saaxiibada iyo jaarka iyadoo la wadaagayo meesha internet-ka laga sii gelayo ama la urursanayo deeqaha ka baxsan internet-ka.



Ka caawi ilmahaaga inuu raaco jadwalka wakhtiga ee hoos ku qoran si aanu wakhtiga kama dambaysta ah loo dhaafin:

1. Barnaamijka Fun for the Arts Dance-a-thon: Maarso 4, 2022

Ardaydu waxa ka qayb qaadanaysaa qoob ka ciyaarka dance-a-thon Jimcaha, Maarso March 4, 2022.

Dhamaan ballanqaadyada daqiiqadiiba ee ka socda dadka wax damaanad qaaday waa in la sameeyaa hor inta aysan bilaabmin dhacdadu.

2. Taariikhda Ururinya Lacagta Loo Qabtay: Maarso 18, 2022

Dhammaan ballanqaadyada deeqaha dhanka internet-ka iyo ka baxsan internet-ka waa in uu dugsigu ku helaa Jimcaha, Maarso 11.

Caawimadaada darteed, carruurteena iyo dugsigeenu wuxuu heli doonaa Run for Arts oo nololi ka muuqato oo saameyn badan leh. Haddii aad hayso su'aalo dheeraad ah, fadlan la xiriir isku duwaha dugsigaaga.

Mahadsanid!

Kooxda Young Audiences